# Coordinated Entry for All (CEA)

**SU’AALAHA BADANAA LA WARSADO**

Sebtember 2016

Isbaanish/Ruush/Af-Amhaarik/Af-Tigree/Soomaali/Fiyatnamiis

## 1. Waa maxay Coordinated Entry for All (Isku-dubbaridka Hoyga ee loogu talagaly Dhammaan) (CEA)?

CEA ayaa hubisa in dadka ay haysato guri la'aantu ay heli karaan ka caawinta helitaanka guriyayn waarta iyada oo la tilmaamo, qiimeeyo, oo lagu xiriiriyo adeegyada taageerada guriyaynta iyo ilaha guriyaynta. CEA isticmaasha aalad qiimayn nidaamsan oo ku aaddisa adeegyada heerka ku habboon iyo ilaha guriyaynta dadka ay haysato guri-la'aantu.

## 2. Sidee ayay CEA u hawlgashaa?

CEA ayaa isticmaasha aalad qaamayn, loo yaqaan VI-SPDAT, sidii loo heli kari lahaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan baahida qoyska kasta ama qof kasta oo guri la'aantu haysato. Guud ahaan, aaladda qiimaynta ayaa ku weyddiisa su'aalo taxane ah oo ku saabsan adiga, caafimaadkaaga, sida ay guri la'aantu kuu haysato, iyo waxa baahida kale ah ee laga yaabo aad qabto.

## 3. Ayay CEA u adeegtaa?

CEA ayaa u adeegta dhamman dadka (qaan-gaarayaasha iskaabulada ah, dhalinta qaan-gaaryaasha da'yarta ah*, lammaanaha, qoysaska, iyo dadka ciidamada ka tirsanaan jiray) aya guri la'aantui haystao. Intaa waxa u dheer, qaan-gaaryaasha da'yarta ah* ee halista u ah guri la'aanta gudahooda 14 maalmood ayaa waliba heli kara adeegyada CEA.

Guri la'aan ahaanta micnaheedu waa adiga oo:

- Ku nool oo seexada dibadda ama goobaha aan loogu talagalin inay dadku ku noolaadaan,
- Ka baxsi ah ama isku dayaya inay ka ka baxsadaan colaad guri**,
- Ku jira gabaad ama guriyayn ku meel gaar ah oo xaald degdeg ah, ama
- Ka soo baxaya hay'ad meel ku hayn*** oo aad ku jirtay ilaa 90 maalmood oo ahayd guri la'aan ka hor int aadan gelin goobta.

* **Qaan-gaaryaasha da'yarta ah**micnaheedu waa qofka u dhexeeya da'da 17.5 jirka ilaa 24 jirka.

**__Colaad guri__** micnaheedu waa qofka ama qoyska ka cabsanaya inay ku noqdaan gurigooda ama la kulmaya xaalado khatar ama nolol halis gelin a, badiyaana ka timaad tacaddi, dabasocod, colaad ka dhalata wada-bixitaan, weerar xoog ugu tagid qof ama weerar oogeed kale. Dadka la soo kulmay ka ganacsiga aadanaha ama ka fa''deysiga arrimaha galmada ku lug leh ayaa ay CEA u adeegi doontaa.

***__Hay'ad__ micnageedu waa jeel, xabsi, isbitaal maskaxeed, isbitaal caafimaad, ama barnaamij ka dawayn maan-dooriye/khamri.

## 4. Sideen ula xiriiri karaa CEA?

Waxaad ula xiriiri kartaa CEA adiga oo waca 211 ama yimaad mid ka mid ah xafiisyada Barta Marinka Degmeed. Cinwaanka xafiisyadani waxay ku qoran yihiin Su'aasha 6.

**5. Anigu ma qancinayo midkoodna shuruudaha lagu sifeeyay Su'aasha 3, halkeen caawimo u tagi karaa?**

CEA ayaa u adeegi karta dadka ama qoysaska qanciya ugu yaraan hal shuruudaga lagu sifeeyay ah Sua'aasha 3. Haddii adiga ama qoyskaagu aad qancisaan wixii kasta ee shuruudaha la qoray ah, fadlan booqo http://crisisclinic.org/ si laguugu xiro adeegyada kale.

**6. Halkay ku yaalliin xafiisyada Barta Marinka Degmeed?**

Kuwaasi waa 5 xafiisyao Bar Marin Degmeed ku yaal dhammaan gudaha King County. Waxay ku qoran yihiin hoosta.

| | | |
|---|---|---|
| **Xafiiska Seattle** | **Catholic Community Services**<br><br>Cinwaanka: 100 23rd Avenue South, Seattle, WA 98144<br><br>Telefoon: 206-323-6336<br><br>Hel Tilmaamaha Jidka | Isniinta –Jimcaha 9 am-5 pm. Saacadaha Fiidadka/Sabtiyada/Axadaha ahaan ballan qabsasho. |
| **Koonfur King County gudaha Federal Way Xafiis** | **Multi-Service Center (Xarun Adeegyo Badan Leh)- Federal Way**<br>Cinwaanka: 1200 South 336th Street, Federal Way, WA 98003<br><br>Telefoon: (253) 838-6810<br><br>Hel Tilmaamaha Jidka | Isniinta –Jimcaha 9 am-5 pm. Fiidadka/Sabtiyada/Axadaha ahaan ballan. |
| **Koonfur King County - Xafiiska Renton** | **YWCA- Renton**<br><br>Cinwaanka: 1010 South 2nd Street, Renton, WA 98057<br><br>Telefoon: (425) 264-1400<br><br>Hel Tilmaamaha Jidka | Isniinta –Jimcaha 9 am-5 pm. Saacadha sabtida ballan qabsasho kaliya. |
| **Woqooyiga King County Xafiis** | **Opportunity Center for Employment and Education (Xarunta Fursadda Shaqada iyo Waxbarashada)**<br>Cinwaanka: 9600 College Way North, Seattle, WA 98103<br><br>Telefoon: 206-753-4890<br><br>Hel Tilmaamaha Jidka | Isniin – Jimce 9am – 5pm. Fiidka/Sabti/Axad ballan qabsasho. |
| **Xafiiska Bariga King County** | **Catholic Community Services - Bellevue**<br>(Xusuunow: Xafiisku wuxuu ku yaal gudaha dhismaha First Congregational Church.)<br>11061 NE 2nd Street, Bellevue, WA 98004<br><br>Telefoon: (206) 323-6336<br><br>Hel Tilmaamaha Jidka | Isniin: 9am - 7pm; Talaadada, Arbacada, iyo Khamiista: 8:30am - 6pm. |

**7. Maxaa dhacaya markaan waco 211?**

Markaad wacdo 211, u sheeg qofka ka jawaabaya wicitaankaaga inaad jeceshahay inaad u qabsato ballan qiimayn guriyayn. Qiimaynta guriyayn ayaa loo dhmaamystiri karaa qof kasta oo ku jira guri la'aan.

Haddii aad tahay dhallin ama qaan-gaare da'yar, waxa jira goobo dheeraad ah oo aad adigu ka heli doonto qiimayn guriyayn. Goobo dheeraad ah oo loogu talagalay dhallinta iyo qaangaarayaasha da'yarta ah ayaa laga heli karaa halkan.

**8. Anigu si fiican uguma hadlo luqadda Ingiriisiga. Miyaan heli karaa qiimayn guriyayn?**

Haa. Shaqaalaha xafiisyada Barta Marinka Degmeed ayaa ku hadli kara dhowr luqadood oo kala duwan. Markaad soo wacdo 211, fadlan u sheeg qofka ka jawaabaya wiciddaada telefoon luqadda kuugu habboon inaad ku hadasho. Haddii ayna shaqaalaha jooga goobta ku kulamauso aanay ku hadlin luqada la mid kaaga, qofka ka jawaabaya wicitaankagaaga ayaa hubin doona inu la heli karo tirjumaan mudaada ballantaada.

**9. Waxaan leeyahay carruur yayar. Ma soo u kaxaysan karaa kulanka qiimayntayda guriyaynta?**

Haa. Waad u soo kaxaysan kartaa carruurtaada ballantaada.

**10. Waxaan leeyahay shaqo am dugsi saacadha maalinimada. Miyaan heli karaa qiimayntay guriyayn?**

Haa. Xafiisyada Barta Marinka Degmeed ayaa kuugu fidin kara saacado fiid ama Sabti ama Axad ah ballan ahaan. Markaad soo wacdo 211, fadlan u sheeg qofka ka jawaabaya wiciddaada telefoon jadwalkaaga shaqo ama dugsi.

**11. Haddii aan hadda ku jiro jeel ama xabsi, miyay CEA icaawin kartaa aniga?**

Haddii aad ahayd guri la'aan ka hor intii lagu jeelka ama xabsiga lagu galin OO aad ku jirtay jeelka ama xabsiga ilaa 90 maalmood ama in kara, markaa CEA yaa ku caawin karta.

Haddii aad tahay qaan-gaare da'yar (17.5 ilaa 24 sano jir), CEA ayaa ku caawin karta haddii ay tahay ugu yaraan laba toddobaad ka hor intaadan ka soo bixin jeelka ama xabsiga. Qofka qaan-gaarka da'yarta ah, ma jirto shuruud ah inaad ahayd guri la'aan woxoogaa ka hor intaadan gelin jeelka ama xabsiga. Ma jirto shuruud ah waliba inaad ku jirtay jeel ma xabsi 90 maalmood ama in ka yar.

**12. Waxaan buuxiyay qiimayn guriyayn, ma jirtaa liis sugitaan loogu talagalay guriyaynta. Intee ayay iga qaadan doontaa inaan helo guriyayn?**

Guriyaynta ma laha liis sugitaan. Tirada dadka iyo qoysaska guri la'aantu hayso ayaa isbeddela maalin kasta. Liisaka abaarmanada ama guriyaynta la heli karo ayaa waliba isbeddesha maalin kasta. Ma jirto dariiq aaan ku ogaano muddada aya qaadanayso inaad kugu aaddino adiga guriyaynta habboon.

**13. Waxaan dhammaystiray qiimayntii guriyaynta laakin xaaladdayda ayaa isbeddeshay. Maxaan sameeyaa?**

Haddii aad rabto inaad cusboonaysiiso macluumaadkaaga kulqa soo xiriirka ama macluumaadka kasta oo kale oo la xiriira qiimayntaada guriyaynta, waxaad u soo wici kartaa khadka telefoonka ugu muhiisan ee ah 206-328-5796 ama soo waca modkoodaba xafiisyada Barta Marinka Degmeed.

**14. Waxaan waxa tebasho ka qabaab ujeeddooyinka iyo habraacyada CEA, markaa yaan la hadlaa?**

Haddii aad wax ka tabanayso arrimaha ku saabsan ujeeddooyinka iyo habraacyada CEA, waxaad wici kartaa 206-328-5796 ama ugu iimayl garayn kartaa cea@kingcounty.gov.